Waxey ku socotaa
waalidiinta iyo dadka kale
ee carruurta ka ag dhow

KU SAABSAN CIYAARAHA DIJITAALKA AH IYO CIYAARAHA LACAGTA LA DHIGTO

Länsstyrelserna

Ciyaaraha dijitaalka ah waxaa ku jira kuwa lagu ciyaaro kombiyuutarka, aaybaadka, moobaylka iyo telefishinka.

Carruur iyo dhallinyaro badan waxey ciyaari karaan iyaga oo aan wax dhibaataha kala kulmin. Badankood waxey ciyaaraha u arkaan in ey tahay mid xiiso leh iyo waqti wanaagsan oo asxaabta lala qaato. Ciyaaraha qaar si firfircoon ayuu ciyaariyahanka uga qeyb qaataa, wuxuu qeyb ka yahay sheekada ciyaarta waxaana lagu soo dhaweeyaa in uu waxyaabo ku dhiirrado. In xariif lagu ahaado ciyaarta waxey maqaam sare siineysaa ciyaariyahanka marka uu asxaabtiisa ku dhex jiro.

Ciyaaraha lacagta la dhigto

waa sida khimaarka warqadaha laga xoqo, khimaarka nambarrada, kuwa fardaha iyo isboortiska iyo ciyaarta khamaarka turubka. In lacag la dhigto oo lagu ciyaaro uma bannaana dadka ey da-doodu ka yartahay 18 sano. Sidaas ey tahay hadana dhallinyaro badan ayaa lacag ku ciyaarta oo dhigata. In lacag lagu ciyaaro waxaa loo heysan karaa in ey tahay wax xiiso leh, sidoo kale riyada ah in si fudud oo degdeg ah faa'iido lacageed loo helo waa waxyaabaha dhiirigelinaya in la ciyaaro. Ciyaarta waxey noqon kartaa qaab looga cararo nolol maalmeedka waaqiciga ah, maadaama uu qofku ka helayo maaweelo iyo madadaalo. Nuucyada kala duwan ee ciyaaraha oo dhan waxey keeni karaan in ey kororto khatar dhibaato, laakiin ciyaaraha ugu khatarta badan waa kuwa mashiinnada otomaatikada ah, ciyaarta khamaarka ee kasiinowga iyo ciyaarta khamaarka ee internetka sida kassinowga internetka, khamaarka turubka ee internetka iyo khamaarka nambarrada (bingo) ee internetka. Xayeysiinta ciyaaraha khamaarka meel walba ayey ka muuqdaan waxey sidaas darteed saameynayaan nolol maalmeedka carruurta iyo dhallinyarada.

Waa maxay dhibaato ciyaareed?

Mararka qaar waxaa adkaan karta in la kontoroolo ciyaarta, haddii ey ahaan laheyd ciyaar dijitaal ah iyo mid lacag la dhigto labadaba. Ciyaarta waxey waqti kala wareegi kartaa waxyaabaha kale ee uu qofku xiiseeyo, waxey sababi kartaa caafimaad darro iyo dhibaatooyin xagga bulshada ah kuwaas oo saameyn ku yeelanayo iskuulka iyo in uu xumaado xiriirka uu qoka la leeyahay qoyska iyo saaxiibada. Haddii uu xaalka sidaas noqdo wuxuu qofka u baahan yahay caawimaad. Dhibaatada ciyaaraha lacagta la dhigto waxey sababi karaan dhibaato xagga dhaqaalaha ah. In lacag la dhigto marka la ciyaarayo ama in la heysto dhibaato khamaar ciyaarid marka dhallinyaro la yahay waxey kordhisaa khatarta ah in ey qofka dhibaato khamaar ciyaarid la soo gudboonaato xattaa marka uu weynaado.

Waxaa jira calaaqad u dhexeysa ciyaarta kombiyuutarka iyo ciyaarta khamaarka ee lacagta la dhigto

Ciyaaro badan oo dijitaal ah waxaa ku jira qeybo khamaar oo kale ah kuwaas oo ey ku jiraan fursado bakhtiyaa nasiib ah oo lagu reyn karo. Ciyaaraha qaar waxaa tusaale ahaan ku jira baakado bakhtiyaa nasiib. Waa baakad ey ku jiraan waxyaabo uusan ciyaariyahan garaneyn inta uusan soo gadan ka hor isla markaana uu ka bixinayo lacag run ah. Baakadka waxaa ku jira waxyaabo sare u qaadi kara awoodda ciyaariyahanka ee ciyaarta ama waxaa ku jiri kara hub cusub. Waxey noqon kartaa jaanis uu qofku ku wanaajin karo fursadihiisa ku aaddan in uu ciyaarta ku guuleysto. Waxaa jirta khatar ah in uu qofka lacag ka bixiyo baakad aanan wanaajineyn fursadaha ciyaariyahanka. Waxaas aan la ogeyn ee la soo gadanayo wuxuu keenayaa xiiso sababi karta in ey qofka u horseeddo dhibaato xagga khamaarka lacagta la dhigta ah.

Wiilasha waxey ciyaaraan in ka badan gabdhaha waxey khatar ugu jiraan in ey la soo gudboonaato dhibaato xagga khamaarka lacagta la dhigto ah.

Shirkadaha khamaarka ee Iswiidhan oo dhan waxey da'doodu ku xaddidantahay 18 sano. Sidaas ey tahay dhallinyaro badan ayaa lacag dhigtay oo khamaar ciyaaray.

Haddii aad adiga ama cunugaaga ka welwelsantahay waxaad la xiriirtaa degmadaada ama xarumaha caafimaadka iyo daryeelka si aad caawimaad u hesho. Leenka caawimaadda taleefanka waxey dadka ciyaara khamaarka iyo qoyskooda siiyaan talooyin.
Si qarsoon ayaad halkan usoo wici kartaa, wax ugu qori kartaa ama iimeel ugu diri kartaa.

Calaamado lagu garto:

- Ciyaarta ayaa wax walbo oo kale ka muhiimsanaaneyso
- Marka uu cunugaagu kontoroolka ka dhumo
- Marka uu cunugaaga ciyaarta ka doorbido waxyaabaha kale ee xilli firaqaha la sameeyo iyo in uu asxaabtiisa waqti la qaato
- Cunugaagu wuu sii ciyaaraa in kasto uu dhibaateysan yahay



Maxaan sameyn karaa ka waalid ahaan?

Ka waalid ahaan waa muhiim in aad xiriir dhow oo aaminaad iyo xasillooni ku dheehantahay la yeelato cunugaaga. Ka waalid ahaan tusaale lagu daydo ayaad cunugaaga u tahay. Marka ey timaaddo in lacag la dhigto waxaan ogsoonnahay in ciyaaridda waalidka iyo mowqifkiisa ku aaddan ciyaaridda ey saameynayaan dabeecadda iyo mowqifka cunugga.

- Maalin walba la hadal cunugaga oo wax walba kala hadal; Waxa ka dhacay iskuulka, internetka, baraha bulshada waxaadna weydiisaa cunugaaga sida uu yahay iyo caafimaadkiisa. Gees iska dhig moobaylka iyo waxa maskaxdaada ka guuxaya. Marka aad hadleysaan waxaad dhiseysaan xiriir muhiim u ah in cunugaaga xittaa uu ku dhiirrado in uu kaala hadlo waxyaabo ey adagtahay in laga hadlo sida biiqsi, lacagta la dhigto ee khamaarka, khamdi iyo maandooriye.
- Kala hadal waalidiin kale caawimaadda ku aaddan ciyaaridda iyo waqtiga shaashadda.
- Cunugaaga wax la samey. Waxey yareyneysaa khatarta ah in aad is dagaashaan waxeyna keeneysaa in aad heysataan wax aad ka hadashaan.
- Xaddidaada da'eed waa muhiim. Ha u oggolaan in cunug ey da'diisa ka hooseyso 18 sano uu ka qeyb qaato ciyaar lacag la dhiganayo. Xusuusnow in ciyaaro kombiyuutareed badan ey leeyihiin da' u xaddidan oo ey tahay in aad adiga xattaa ka qof weyn ahaan aad u ogaato. Kontorool in xadka da'eed ee ciyaarta la raaco. Lacag ha dhigan oo hala ciyaarin cunugaaga. reysmo hore ee nolosha cunugga waxey ku abaabineysaa in uu sii wado in uu lacag dhigto.
- Kala xaajoo xayeysiiinta ciyaaridda khamaarka ka caawi ilmaha in ey si ceeb ka raadis ah uga fekeraan dhambaalka ey xayeysiinta xambaarsantahay.
- Ka war haay kaarka akoonka ee ku xiran bogagga internetka ee ciyaaraha ee uu cunugaaga wax uga iibin karo ciyaar kombiyuutar. Xusuusnow in aad qariso gelitaanka bogagga ciyaaraha khamaarka haddii aad adiga naftigaada lacag dhigatid oo aad khamaar ciyaartid.

- Waxaa jira ciyaaro internetka lagu dheelo oo carruurta ku dhiirrigelinayo in ey iibsadaan isla markaana ciyaaraan waxyaabo lacag jooga. Cunugaaga kala hadal khatarta ey leedahay ciyaaridda, qiimaha lacagta kala xaajoo xaddidaada da'eed iyo mowqofkaada ku aaddan.
- Haddii uu cunugaaga u ciyaaro qaab saameyn xun ku reebeyso waxaa waxa kama dambeynta ah ee ugu wanaagsan noqon kara in aad caawisid isla markaana xaddid waqtiyada ciyaaridda. Haddii aad caawimaad u baahan tahay waxaad la xiiiri kartaa degmada, xarumaha caafimaadka iyo daryeelka ama Leenka caawimaadda. Aamin waxa niyaddaada ku jira oo la hadal cunugaaga haddii aad welwelsantahay. Badanaa waad saxantahay haddii aad dareemeysid in ey wax qaldan yihiin.
- Cunugaaga wuxuu ku caafimaadaa in uu maqlo in aad ka fikireyso oo aad dan ka leedahay, in aad xiiseyneysid fikradaha cunugga iyo dareemihiisa isla markaana aad isku taxallujineysid in aad wax ka ogaato, in kastoo eysan mar walba sidaas u muuqan.
- Ka hadal ciyaaridda iyo waqtiga shaashadda la horfadhiyo. Xiise u qab waxa uu cunugaaga sameynayo marka uu online-ka yahay, dhageyso cunugga si wada jirna u sameeya sharciyo iyo nidaam markasta la raaco. Ciyaaridda ma ahan in ey waqtiga ka qaadataa iskuulka, hurdada, howlaha firfircoonida ee bulsho, cuntada iyo jimicsiga. Tusaale ahaan waxaa shaashadda la hor fariisan karaa marka la sameeyo leyliska casharrada. U sharrax sababta loogu baahan yahay nidaam mar kasta la raaco – cunugaaga wuu ku degayaa in uu ogaado in ey jiraan xuduud.

Akhri warbixin dheeraad ah

Leenka caawimaad https://www.stodlinjen.se/#!/

PEGI waxey heysaa warbixin ku saabsan xaddidaada da'eed ee ciyaaraha kombiyuutarka https://pegi.info/sv

"https://www.statensmedierad.se/press/nyheterkronikorochpressmeddelanden/arkivnyheter/nyheterpressmeddelandekronikor/foraldraguidertillbarnensinternetkortasvarpasvarafraqor.4384.html

https://www.folkhalsomyndigheten.se/spelprevention/unga-och-spel/foraldrar-och-andra-vuxna-i-barns-narhet-ar-viktiga/

Macluumaad xiriir